

La kulanka Dhakhtarka

- Bukaanka:* Subax wanaagsan!
- Dhakhtarka:* Subax wanaagsan! Sidee ayaad tahay?
- Bukaanka:* Yara neerfis ayaan ahay.
- Dhakhtarka:* Waan fahmay, waa iska caadi. Aad ayey muhiim u tahay in aad iska qaaday tijaabada Hiv:ga. Dad badan ayaan ogeyn, in ay qadeen cudurka Hiv:ga. Nidaamka difaaca jidhkooda ayaa diciifaya muddo gudeheed. Isla markana waxay qaadsiin karaan dadka kale, iyaga oo aan ogeyn.
- Imika waxa aanu ku siin doonaa daawooyinka *antiretroviralka* loo yaqaano (waa Daawoojinka joojiya sii faractanka Hiv:ga) Hadii aad si joogto ah u qaadatid daawoojinkaas, ma qaadsiinaysid cudurka dadka kale.
- Bukaanka:* Haa, waan fahmay. Sidee ayey arintani u saamaynaysaa nolohsayda laga bilaabo maanta?
- Dhakhtarka:* Ulajeedadu waxay tahay, in daawoojinkan hoos loogu dhigo tirada fayraska ee cudurka. Lana gaadhsiiyo heer aan la cabirakaraynin. Dawadu waxay kaa caawinaysaa awooda nidaamka difaaca jidka, oo markaasna dadka kale ma qaadsiinaysid cudurka.
- Bukaanka:* Waa arin fiican, Niyada ayey aad iigu dajinaysaa. Dawadu miyey ii keenaysaa wax yeelo gaar ah?
- Dhakhtarka:* Waayahan waxa la helaa daawin kaladuwan, oo isku jira, oo *antiretroviral* ah, oo gaadhaya 20 in ka badan. Waxa aanu kuu heli doonaa kuwo isku jira, oo adiga kugu haboon. Haka baqan in aad dhibaatooyin gaar ah kala kulantid. Waxa laga yaabaa, in lagugu daaweeyo maalintiiba hal kiniini oo ka samaysan daawooyinka *antiretroviralka* ah.
- Bukaanka:* Muddo intee leeg ayaan qaadanayaa daawada?

- Dhakhtarka:* Isticmaalka daawada *antiretriviral* waa daa'iman. Hadii aad joojisid daawadan, fayraska ayaa sii kordhaya. Sidaas darteed waa in aad qaadatid daawada maalin kastaba.
- Bukaanka:* Haa, waa la fahmi karaa. Laakiin tijaabada? Ma marwalba waa in aan isa soo tijaabiyo miyaa?
- Dhakhtarka:* Waa in tijaabooyin aan kaa qaadno. Khusuusan ahaan ayaamaha hore, laakiin marka aan helno qiyaasta daawada, waxa aad maraysaa tijaabada mar mar iyo dhif, isla markaana waxa aad la kulmaysaa dhaktarka sanadkiiba laba jeer.
- Bukaanka:* Ma lacag ayaa layga rabaa in aan daawada ka bixiyo?
- Dhakhtarka:* Hadii aad Finalnd degaan ku leedahay, bilaash ayey kuu tahay daawada iyo ka daawayanta Hiv qaba.
- Bukaanka:* Imika marka Hiv layga helay, ma saamayn ayey ku keenaysaa degenaantayda Finalnd.
- Dhakhtarka:* Qabitaanka Hiv:ga saamayn kuma keenayso deganaantaada Finalnd.
- Bukaanka:* Weey! Ma in aan u sheego ayey tahay saaxiibaday iyo qaraabadayba, cudurkan joogtada ah ee aan baxayn?
- Dhakhtarka:* Adiga ayaa go'aaminaya ciddii aad u sheegaysid ama aanad u sheegayn.
- Bukaanka:* Waxaan rabi lahaa in aan la kulmo dad kale oo qaba Hiv.
- Dhakhtarka:* Waxa aan kuu soo jeedin lahaa, in aad la xidhiidho ururka *positive* – Hiv Finalnd. Waa urur-bukaanka keliya ee Finalnd ee loogu talo galay dadka Hiv:ga qaba iyo qaraabadood. Waxa aad meehsaas ku soo bandhigi kartaa figradahaaga, isla markaana aad ka faa'iidayaan kartaa fikradaha dadka kale. Maxaad dareemaysaa hadda?
- Bukaanka:* Imika sidii hore aad ayaan uga fiicnahay. Waxaan Fahmay, in aan nolol noormal ah noolan karo. Run ahaantii waaba arin fiican, in cudurkan Hiv:ga layga helay goor hore. Waxa aan u soo jeedinayaa asxaabtayda oo dhan, ay maraan tijaabada Hiv:ga ugu yaraan sanadkiiba mar. Waa arin fiican, in layska war hayo.

Aad ayaad ugu mahadsantahay arimahan aad ii sheegtay oo dhan. Aad iyo aad ayaan kuugu mahad celinayaa. Waxa aan fahmay, in qabitaanka Hiv:ga ahayn dariiq la'aan. Noloshaada waxyaabo badan ayaad ku samayn kartaa.

Dhakhtarka:

Maya maya, maaha dariiq la'aan. Waa arin fiican, in aad xaggan nala joogtid maanta. Imika waxaan ku barayaa kalkaalisda. Iyadda ayaad kawada xaali doontaan arimaha guud.

Bukaanka:

Aad ayaad u mahadsantahay.

Dhaktarka:

Soo dhawoow, Adiga ayaa mudan